

# Barnaamijka Daryeelka Isku dhafan: Maxaa laga filayaa

Saint Paul, Baxter, Burnsville, Maple Grove, Phalen



## WAA MAXAY BARNAAMIJKAA DARYEELKA ISKU DHAFAN (COMPLEX CARE)?

Daryeelka isku dhafan ee Gillette waa barmaamij leh koox dhameystiran oo eegaya qofka oo dhan. Hadafkeenu waa inaan isku xidhno daryeelka caafimaadka oo aan iskaashano bukaanada iyo qoysaska si aan uga wada shaqeyno fayoobida jidheed, shucuureed iyo mid bulsheed. Wuxaan iskaashi la sameynaa bukaanada iyo qoysaskooda si aanu u horumarino hadafyo la gaadhi karo oo la xidhiidha baahiyaha dhanka caafimaadka iyo kuwa aan khuseynin caafimaadka, si aan u garano daldaloolada daryeelka, iyo inaan qorsheyno talaabooyinka xiga.

Si aan u hubino inaan buuxino baahiyaha shaqsi kasta, waxaan iskaashi la sameynaa khabaaro badan oo kala duduwan iyo ilaha kheyraadka bulshada dhexdeeda. Kooxdaada daryeelka isku dhafan waxay si dhaw u wada shaqeeyaan:

- Dhakhtarkaada caafimaadka guud
- Dhakaatiirtaada takhasuska gaarka ah ee Gillette iyo kuwa ka baxsan Gillette.
- Xubnaha kale ee ka tirsan kooxda Gillette, oo ay ka mid yihiin shaqaalaha arrimaha bulshada, dabiibayaal iyo khabirada cuntada.
- Adeegyada kaalmada bulshada

Daryeelka isku dhafan ma aha daryeelka caafimaadka guud. Wuxaanu wada shaqeyn la leenahay dhakhtarkaada caafimaadka guud iyo kooxdaada daryeelka si aan u taageerno una xidhiidhino daryeelkaada.

## YAA U QALMA BARNAAMIJKAA DARYEELKA ISKU DHAFAN?

Daryeelka isku dhafan ee Gillette waxaa si gaar ah loogu talagalay caruurta iyo dhalinyarada da'dooda tahay 0 ilaa 26 kuwaas oo leh xaalado badan oo caafimaad oo muddo dheer ama baahiyoo caafimaad oo isku dhafan.

Bukaanada da'doodu tahay 26 iyo ka weyn, waxaa loo hayaa ballamo diirada lagu saarayo si wax looga qabto u gudbista daryeelka caafimaadka dadka waaweyn, ama xidhiidhinta daryeelka caafimaadka dadka waaweyn.

## SIDEEN U SAMEYSTAA BALLANTA DARYEELKA ISKU DHAFAN?

Bukaanadu waxay heli karaan ballan ay iskood u codsadeen ama mid uu usoo gudbiyey daryeel bixiyahooda caafimaadka guud ama mid takhasus gaar ah.

Si aad ballan u qabsato ama aad wax badan uga ogaato barmaamijka daryeelka isku dhafan ee Gillette:

**Bukaanada / Qoysaska: Fadlan wac 651-290-8707**

**Daryel Bixiyeyasha: Fadlan wac 651-325-2200**

Khabirada daryeelka isku dhafan ee Gillette ayaa bixiya ballamaha Kiliinigga  
Daryeelka Degdegga ah Isniinta ilaa Jimcaha oo loogu talagalay bukaanada Gillette ee wajahaya xanuunada yaryar.

## MAXAAN KA FILAN KARAABALLANTA DARYEELKA ISKU DHAFAN?

Daryeelka isku dhafan wuxuu dhigayaa ilmahaada badhtanka daryeelka, oo ay taageereyso wada shaqeyn isku xidhiidhsan oo lala yeesho dhakhtarkaada daryeelka caafimaadka guud iyo takhasusyada gaarka ah. Dhanka daryeelka isku dhafan waxaad haysataa qof heegan u ah inuu kaa caawiyo isku dubaridka daryeelka ilmahaada. Bixiyaha daryeelka isku dhafan ayaa dib u eegis ku sameyn doona diiwaanada caafimaadka ee la hayo kahor ballanta ilmahaada. Booqashada ugu horeysa ee ilmahaada ku leeyahay xarunta daryeelka isku dhafan, waxay qaadan doontaa qiyaastii 2 saacadood. Waxaan

kawada hadli doonaa taariikhda caafimaadka ilmahaada, xaalada caafimaad ee hadda iyo adeegyada guriga, iskoolka, iyo bulshada. Waanu kula shaqeyn doonaa si aan isugu dubaridno qorshe daryeel. Tani waxaa ku jiri kara shaybaadh, raajooyin, ama gudbiska dhakhaatiir iyo adeegyada kaalmada.

Ballamaha la socodka waxay noqon doonaan hal saac maadaama aan dib u eegis ku sameyneyno qorshaha haatan socda iyo xaaladda caafimaadka, iyo cusbooneysiinta qorshaha daryeelka. Markuu ilmahaada weynaado, waxaan sidoo kale kaa caawin doonaa ugudbista adeegyada daryeelka dadka waaweyn

## MAXAAN KEENAA BALLAN KASTA OO AH DARYEELKA ISKU DHAFAN?

Sababtoo ah ballamaha waxay noqon karaan kuwo dhaadheer oo faahfaahsan, fadlan soo qaado waxyaabaha soo socda si aad u hubiso ballan habsami leh.

- Alaab ay ku madadaashaan ilmahaada inta aad la hadlaysid daryeel bixiyaha
- Wax kasta oo loo baahanyahay xannaano ahaan inta lagu jiro waqtiga ballanta (2 saac ugu yaraan)
- Liiska dawooyinka oo dhameystiran
- Liiska daryeel bixiyayaasha wakhti xaadirkan
- Warqadaha daryeelka oo kooban hadii la heli karo
- Liiska su'aalaha iyo walaacyada
- Waa Ikhtiyaari: Qoysaska qaar waxay ka helaan waxtar inay keenaan qof dheeraad ah oo taageero siiyo



Tori Bahr, MD, FAAP  
Pediatrics/Internal  
Medicine



Art Beisang, MD  
Pediatrics



Heidi Davis, APRN, CPNP-PC  
Pediatrics



Peter Ladner, MD  
Pediatrics/Internal  
Medicine



Julie Mills, APRN, CPNP-PC  
Pediatrics



Micah Niermann, MD  
Pediatrics/Internal  
Medicine



Jean Stansbury, APRN,  
CPNP-PC  
Pediatrics



Deana Thomasson, APRN,  
CPNP-PC  
Pediatrics



Uyen Truong, MD  
Pediatrics